Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku Socota Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Qurbaha ku nool (No. 8)**

**Nairobi, 2 Disembar 2008,**

**As-salaamu Aleykum**

**Saaxibayaal,**

Arrimahu si xawli leh ayey ooga socdaan Soomaaliya gudaheeda, sidaas darteed waxaan idiin kugu soo qorayaa warqaddani si aan idiin kaga warbixiyo, idiin kagana codsado in aad ugu diyaar garowdaan arrimaho muhiim ah ee xilligan ka dhacaya dalkiina. Geedi socodka nabadda hore ayuu u sii tallaabsaday, waqtigan hadda la joogana waxaa loo baahan yahay in qof walba sida oogu haboon uu dadaal ula yimaado.

Sida aan hore idiin kugu soo sheegay, kuwa ka dambeeya sii socoshada nabadgelyo la’aanta ka jirta Soomaaliya, ma’ahaandoonaan kuwa baxsada ayga oo aan ciqaab marin. Sida uu dhigaayo qodobka 9aad ee Heshiiska Jibuuti, shir ku saabsan Cadaaladda iyo Dib u Heshiisiinta ayaa lagu qabtay Jibuuti inta u dhaxeesay 22-23 Nofembar 2008,waxaana lagu heshiieye in wax laga qabto dhaqan xumadda ku saleysan “Dembi gal haddana iska soco ciqaab la’aan “*Impunity*”. Wuxuu ka hadlay shirku tallaabooyin badan oo la qaadi karo; sida sameynta Guddi Baaritaan Caalami ah ku sameeya Soomaaliya, ka dibna dembiilayaasha dagaalka u soo magacaaba Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada Dagaalka ama Maxkamadda Caalami ah ee Soomaaliya khuseysa ama Guddi Sare ee Qaabilsan Cadaaladda iyo Dib u Heshiisiinta ( Sida Koonfur Afrika oo Kale). Tani waa tallaabo hore loogu qaaday. Kuwa xadgudubyada ka geystay Soomaaliya, sababena dhimmashada iyo dhibaateenta dadka Soomaaliyed ee aan waxba galabsan isla-markaasina isku dayaya in ay qasaan Geedi Socodka Nabadda, waxaa la horkeenayaa Maxkamadda Alle iyo tan Bin’aadankaba. Arrintani waxaa aad loogu sii cadeeyey Qorarka cusub ee Golaha Ammaanka kas oo dalbanaaya in tallaabo laga qaado dadka Dagaal-oogeyaasha “WAR MONGERS”. (UNSC1844)

Sida aad ogsoontihiin, Guddiga Arrimaha Heerka Sare wuxuu ku kulmay Jibuuti si uu si ficil ah ooga hadlo habkii loo hirgelin lahaa iskaashiga Arrimaha Siyaasadda. Wuxuuna ka hadlay go’aankiisii taarikhdiisu ahayd 26ka Oktoobar taasoo oo ku soo beegneed kulan Madaxeedkii IGAD, Go’aankaas oo ku saabsanaa ballaarinta Barlamaanka. Barlamaanka cusub xubnihiisu waxay ka koobnaandoonaan dhammaan Mudaneyaasha hadda jira, Xubnaha ARS, Bulshada Rayidka, Bulshada

Qurbaha ku nool iyo Ganacsatadaba. Tallo soo jeedintani waa in laga doodaa laguna ansixiyaa shir dhicidoona dhammaadka bishan. Waxaan ka war-hayaa dood ka dhex dhacday kulankii Guddigii Heerka Sare markii uu Jibuti ku shirsanaa, waana in la ogaadaa, marka uu Guddiga Shiraayey, sidii dheci jirtay kulanadiisi hore oo kale, wuxuu ahaa shirku mid furan, xaqiiqdana looga hadlay ayadoo ujeedadiisu ahayd Hirgelinta Heshiiskiisi Hore ee ku saabsanaa ballaarinta Barlamaanka si uu u noqdo mid loo dhan yahay ka dibna uu baadi goobo Habkii loo dhisi lahaa Dawlad Midnimo ku dhisan.

Guddiga Wadajirka ee Arrimaha Nabadgelyada wuxuu tababar ku qabsaday magaalada Naifasha-Kenya, wuxuuna ka hadlay Arrimaha Mustaqbalka la qaban lahaa, wuxuuna soo jeediyey arrimo badan oo loo sameyn karo si ficil ah: sida sameynta ciidammo ku-meel-gaar ah ee loo wada-dhanyahay iyo habkii ay u kala amar qaadan lahaayeen Ciidamadaasi, waxaa kale oo ay ka hadleen habkii loo sameyn lahaa Guddigii Xaqiijinta iyo La-socoshada Arrimaha, iyo sameynta Guddi Wadajir ah ee ka soo shaqeeya habkii la-isugu dhafi lahaa Boliska Soomaaliyed.

Sida aad ogsoontihiin, Dawladda Ethiopia waxay ku dhawaaqaday qorshaheeda ku aadan kala bixidda ciidammadeeda Soomaaliya dhammaadka Sanadkan. Arrintani waxay Soomali ka dhex abuuri kartaa caqado- waaweyn. Arrinta hadda ugu muhiimsanna waxay tahay in aan la waayin ciidammo suga nabadgelyada kana hortaga dagaal cusub in uu dhaco, isla-markaasina xaqiijiyo hirgelinta heshiiska Jibuuti iyo sida loo dhowri lahaa. Sidaas darteed, waxaan u sheegayaa Jaallayadda Soomaaliyed inay caawiyaan walaalahooda Soomaaliyed, mideyaana si ay sharaftooda u illaalin lahaayeen, Codka shaqsiyaadka horseedka ka ah nabad sameyntuna uu u guuleyan lahaa.

Maheleyaan cudur-daar kale oo ay ku sii wadaan qas, kuwii dhihi jiray waxaan doonayna in aan Itoobiya wadanka ka saarno. Kuwaasi arrintoodu waxay caddaandoonta haddii ay ku sii dhegenaadaan wadadda colaada si ay danno gaar ahaaneed ooga helaan dhibaatada sida Awood ama maaliyadba- taas oo aan wax dan ah oogu jirin wanaaga guud ee Ummadda Soomaaliyed. Waxaan si dhab ah u aamin-sanahay in ay dadka Soomaaliyed joojin doonaan iskaga horimaadka hadda socda ayna sahli doonaa siddi ay nabadda ku soo noqonlaheed. Waa in la cambaareyaa lana diidaa wixii cudur daar ah ee loo sameenaayo in uu sii socdo qaska iyo buuqa.

Wargaysyadda adduunka waxay si xoog leh u qoreyaan arrinta khatarta ah ee la xiriirta burcad badeeda. Annigu waxaa qabaa arrintani in ay ku xiran tahay deggenaansho la'aanta iyo dembiyada ka socda dalka gudihiisa. Sidaas darteed waxaan Nairobi ku qabannaynaa Shir caalami ah ee Heer Wasiir ah inta u dhexeesa 10ka – 11ka Disembar kaas oo ku saabsan Burcad-badeeda, waxaana furidoono Madaxweyne Kibaki ee Kenya.

Xaaladda Soomaaliya si joogta ah ayey maalin walba isu bedeleysa, ha ahaato dalka gudihiisa ama dibeddisaba, haddaba, waa in aad u hawlgashaan sidii natiijo wax ku ool ah u dhalan laheyd. Dhammaan arrimahan oo dhanna waxay ku xiranyihiin dadka Soomaaliyed oo keli ah. Sida caadada ahaan jirtay, hawl-galkiina wuxuu aad wax ooga tarayaa isu keenista dadkiina, soo celinta nabadda, deggenaashaha iyo Dhowrista sharaft dadka Soomaaliyed. Ka duceysta si loo dhameyn lahaa inaan

waddankiinan weyn aan mar dambe loo dhihiin waa wadan “Qarannimadiisa Fashilantay”: **“failed State”** Arrintan oo inta badan wadankiina lala xiriiriyo.

Walaalkiina,

Ahmedou Ould-Abdallah